

Xuquuqdaada marka aad joogto Saldhigga Booliska



Dad badan ayay ku adag inay fahmaan waxa ka dhaca saldhigga booliska.



Haddii booliska uu rabo inuu ku weydiiyo su'aalo, waxaa

wanaagsan inaad u sheegto haddii aad u baahan tahay caawinaad

iyo haddii aadan fahmeynin.








Booliska ayaa og in dadka





u baahan caawinaad xaga xariirka ah ay u baahan yihiin

waqti yar oo dheerad ah si ay wax u aqriyaan oo ay uga jawaabaan

su'aalaha.

Tusmooyinka

	<p>Xiridda iyo xabsiga boolis geynta</p>	<p>Bogga 4</p>
	<p>Ka jawaabidda su'aalaha booliska</p>	<p>Boggaga 5 - 6</p>
	<p>Wac Qof weyn oo ku Habboon</p>	<p>Bogga 7</p>
	<p>U sheegidda qareenka inaad joogto saldhigga booliska</p>	<p>Bogga 8</p>
	<p>U sheegida qof kale inaad joogto saldhigga booliska</p>	<p>Bogga 9</p>
	<p>Haddii aad jirtid 16 ama aad ka yar tahay 16 sano ama haddii aad jirto 16 ama aad tahay 17 sano jir hoos yimaada kormeerka maxkamadda ee khasabka ah</p>	<p>Boggaga 10 - 11</p>

	<p>Maxaa dhacaayo haddii lagu soo eedeeyay ama laguugu keenay saldhiga booliska amarka maxkamada?</p>	<p>Boggaga 12 - 13</p>
	<p>Ilaa intee ayaa laguugu hayn karaa saldhigga booliska?</p>	<p>Bogga 14</p>
	<p>La kulanka dhakhtarka ama kalkaaliyaha</p>	<p>Bogga 15</p>
	<p>Dacwo sameynta</p>	<p>Bogga 16</p>

Xiridda iyo xabsiga boolis geynta



Booliska waxay kuu sheegi doonaan sababta lagu xiray.



Booliska ayaa ku weydiin doona haddii aad fahantay.

Haddii aadan fahmin inta badan waa inaad dhahdaa “maya”.

Keliya dheh “haa” haddii aad fahanto.

Ka jawaabidda su'aalaha booliska



Waxaad xaq u leedahay inaad aamusnaato.

Su'aalo kasta oo booliska ku weydiiyo **uma** baahnid inaad ka jawaabto. **LAAKIIN** uma baahnid inaad u sheegto ayaga—

magacaaga



meeshaad ku nooshahay



Goorta ay tahay dhalashadaada

meeshaad ku dhalatay iyo

wadaniyaddaada



Haddii aadan garaneyn faahfaahintaan qaarkooda waa inaad u sheegtaa booliska.

Wax dhibaato ah makala kulmi doontid booliska haddii aadan ka jawaabin su'aalaha kale.

Booliska ayaa kuu sheegi doona wayna qori doonaan waxwalba aad dhahdo.

Haddii aad doorato inaad ka jawaabto su'aalaha, waxwalba aad dhahdo waxaa loo isticmaali karaa cadeen ahaan haddii kiiskaaga maxkamad uu aado.



Wac Qof weyn oo ku Habboon



Haddii aad u baahan tahay caawinaad, u sheeg booliska “**wac Qof weyn oo ku Habboon**”

Qofka weyn ee Mas'uulka ah waa ruuxa kaa caawin kara inaad fahanto waxa booliska sheegaayo. Tani waa bilaash.



Qofka weyn ee mas'uulka ah wuxuu kaa caawin doonaa inaad fahanto xaquuqdaada iyo waxa dhacaayo.

Waxay kuu sharixi doonaan su'aalaha uu booliska ku weydiiya haddii aadan fahmin ayaga.

Sidoo kale waxay sharxi karaan waxa booliska sameynaayo ma ahan keliya waxa ay dhahaan.



Qofka weyn ee mas'uulka ah kuma siin karo talo.

Booliska ayaa u wici doona qof weyn oo ku caawiya haddii ay u maleeyaan inaad u baahan tahay mid xitaa haddii aadan waydiisan.

Waa muhiim inaad waydiisato haddii aadan fahmin.

U sheegidda qareenka inaad joogto saldhigga booliska



Waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho **qareen** si gaar ah waqti kasti xitaa ka hor intaan lagu weydiinin. Tani waa bilaash.

Qareenka waa qof kaas oo ilaaliya xaquuqdaada oona kaa caawin kara difaacaaga.

Qofka ku Caawinaayo/masuulka ah makula soconaayo markaad la hadleyso qareenkaaga.

Haddii aad rabto inaad la hadasho qareen, waa inaad dhahdaa “haa” marka uu booliska ku weydiyo.

Haddii aad haysato qareen waa inaad u sheegtaa magacyadooda booliiska. Booliiska ayaa isku deyi doona inay wacaan Tani waa bilaash.

Haddii aadan haysan qareen waxaad u baahan tahay inaad u sheegto booliska oo mid ayay kugu wici doonaan.

Booliska ayaa isku deyi doona inay la xariiraan qareenkaaga sida uga dhaqsiyaha badan. Tani waa bilaash.

Qareenka wuu kula joogi karaa qolka haddii booliska ku wareysanayaan adiga. Tani waa bilaash.

Waad la hadli kartaa qareenkaaga taleefoon ahaan ama wuxuu imaan karaa saldhigga booliska si uu kuu arko. Iyaga ayay u taala.

Waxaa lagu weydiin doonaa mar labaad haddii aad jeclaan lahayd in qareen kuu joogo wareysiga xitaa haddii aad la yeelatay wada hadal taleefoon ah ayaga.



U sheegida qof kale inaad joogto saldhigga booliska



Xaq ayaad u leedahay in loo sheego qof inaad joogo saldhigga booliska.

Booliska ayaa ku weydiin doona qofka aad jeclaan lahayd in laguugu waco.



Kani waxuu noqon karaa qof qoyskaaga ka mid ah, asxaabtaada, daryeelkaaga, saaxiibkaaga ama qof kale aad kaseyso.

Waxaa laga yaabaa in laguu oggolaanin inaad la hadasho qofkani.

Haddii aad ka yar tahay 16 sano ama haddii aad tahay 16 ama 17 sano jir hoos yimaada amarka kormeerka maxkamadda ee qasabka ah:



Booliska waa inuu isku deyaa in uu u sheego waalidkaaga aa masuulkaaga inaad joogto saldhigga booliska.



Waxaad xaq u leedahay in waalidkaaga ama masuulkaaga oo uu kugu soo booqdo saldhigga booliska.



Keliya kuwa ka yar 18 sano ayaa heli kara booqoshooyin.





Qareen waa inuu kula joogaa marka booliiska ku wareysanayaan adiga haddii aysan jirin **daruufo gaar ah**.

Tusaale ahaan, haddii booliiska u maleeyo inaad heyso macluumaad muhiim ah si ay u joojiyaan qof in la waxyeeleeyo waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay ku weydiyaan su'aalo ka hor inta qareenkaaga uusan imaan.

Haddii aad tahay 16 ama 17 jir oo aad ku hoos jirto amarka kormeerka ama amarka maxkamadda ee khasabka ah ee ku meel gaadhka ah ma DIIDI kartid inaad yeelato qareen

Xitaa haddii ay jiraan daruufo gaar ah waxaad xaq u leedahay inaad aamusto.



Maxaa dhacaayo haddii lagu soo eedeeyay ama laguugu keenay saldhiga booliska amarka maxkamada?



Haddii lagu soo **eedeeyay**, waxaa laga yaabaa in lagu oggolaado inaad baxdo ama waxaa laga yaabaa inaad joogto xabsiga booliska oo aad aado maxkamada maalinta xigta ee suurtoogalka ah.



Haddii lagu soo eedeeyay booliska waxay rabi doonaan inay qaadaan:

- **farahaaga**



- **Muunada DNA-ga** (waxay si tartiib ah ugu masaxi doonaan gudaha afkaaga suuf)



- **sawirkaaga**



Haddii lagugu keeno saldhiga booliska **amarka** maxkamada, waxaa laga yaabaa inaad joogto xabsiga booliiska oo aad aado maxkamada maalinta xigta ee suurtoogalka ah.

Ilaa intee ayaa lagugu hayn karaa saldhigga booliska?



Booliska waxay ku hayn karaan **ilaa 12 saacadood ayaga oo dambi kugu soo oogin.**



Booliska waxay ku siin doonaan cunto woqtiyada cuntada haddii ay ku haayaan in ka badan 4 saacadood.

Haddii ay jiraan wax cunto ah aadan cuni karin, u sheeg booliska sida uga dhaqsiyaha badan.

Haddii oon ku haayo weydii booliska in uu ku siiyo biyo.



Booliska waxuu kugu hayn karaa **ilaa 24 saacadood laakiin waa haddii Kormeeraha Booliska ku raaco midaan** (ama Kormeeraha Guud haddii aad ka yar tahay 18 sano).



Waxaad xaq u leedahay inaad ra'yigaaga ka dhiibato wax ku saabsan go'aankani, ama waxaad dooran kartaa in qareenkaaga uu kuula hadlo booliska adiga.



La kulanka dhakhtarka ama kalkaaliyaha

Waxaad xaq u leedahay inaad la kulanto **dhakhtar** ama **kalkaaliye** haddii aad xanuunsato ama dhaawac ku soo gaaro.

U sheeg booliska haddii aad ku fikireysid inaad la kulanto dhakhtar ama kalkaaliye.

Waa muhiim inaad u sheegto booliska haddii xaalad caafimaad aad qabto ama aad qaadaneyso daawo.



Waxaa kale oo muhiim ah inaad u sheegto Booliska haddii aad qabsatay maandooriyaha ama khamriga ama haddii aad ka fikireyso inaad waxyeeleyso naftaada.



Tani waxay caawineysaa Booliska inay ku daryeelaan adiga marka aad xabsiga booliska aad ku jirto.



Dacwo sameynta



Waxaad xaq u leedahay inaad ka **dacwooto** qaabka booliska kuula dhaqmay.

Haddii aad ka dacwooneyso Booliska Scotland tani kama dhigi doonto kiiskaaga inuu u egyahay mid xun.

Waad sameyn kartaa dacwo markaad ku jirto xabsiga.

Haddii aad rabto inaad dacwooto markaad ku jirto xabsiga, weydii inaad la hadasho kormeeraha ama qof darajo sare haysto.



Haddii aad rabto inaad dacwo qorato ka dib markii lagu soo daayay, waxaad aadi kartaa saldhiga walba.

Haddii uu ku waxyeeleeyay ama ku dhaawacay sarkaal boolis xiliga aad xirneed ama aad ku jirtay xabsiga waa inaad u dacwootaa Waaxda Heerarka Xirfidliyaasha Booliska Scotland.



Si aad u dacwooto wac 101 ama tag saldhiga deegaankaaga.

Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa qof kale si uu kuugu dacwooda adiga. Waxuu noqon karaa waalid, saaxiib, rafiiqa, ama qof kale aad ku kalsoon tahay.

Waxaad u baahan tahay inaad siiso oggolaanshahaaga oo qoraal ah.



Waxaan rabaa inaan dacwo qorto

Waxaa soo saaray wakiilka

SOLD Network

waxaa qoray

People First (Scotland)


77-79 Easter Road,

Edinburgh,

EH7 5PW

0131 478 7707

Shirkadda ku xaddidan
dammaanada Lambarka.
173180 iyo Samafalka Scottish
oo ka Diiwaangashan
Lambarka. SC 026039



**People First
(Scotland)**



**POLICE
SCOTLAND**

Keeping people safe

POILEAS ALBA